Ku hagidda qoyska MAP Growth

Carruurta si wanaagsan ayay wax u bartaan—oo dhaqso ah—marka macalimiintu helaan xogta dhabta ah ee ku aadan ardayga waxa uu bartay iyo waxa uu diyaarka u yahay inuu barto. Taasi waa sababta ay koox macalimiin ah iyo cilmi baarayaal u aasaaseen NWEA®, hay'ad aan faa'ido doon aheyn ee aasaastay xallalka qiimeynada loogu aaminsanyahay oo lagu xisaabtamo ee la heli karo. In ka badan 11 milyan arday ah ee ku nool Mareykanka iyo 140 wadamo caalamka oo dhan ayaa isticmaalo MAP® Growth™.

Sida ay u shaqayso

MAP Growth waa imtixaanka la qabsiga kumbuyuutarka. Haddii canugaaga uga jawaabo su'aalaha si sax ah, su'aasha xigta aad ayay u adkaaneysaa. Haddii jawaabta ay ka dhiibaan ay tahay mid qalad ah, mida xigta way fududaaneysaa. Qiimeynta noocaan ah waxay la tartantaa bandhigayaasha ugu horeeyo iyada oo aan jirin buux dhaafinta ardayda ee xirfadahooda ay ka hooseyso heerka fasalka.



MAP Growth waxay ku bilowdaa su'aasha arday kasta oo dhigta fasalka ayagoo su'aasha ku salaynaaya heerka iyo hormarka uu sameeyay shaqsigu.

Waxa ay cabbirto

MAP Growth waxay isticmaashaa baaxada RIT si ay si sax ah u cabirto waxa ardayga garanaayo, ayadoon aan laga eegin heerka fasalkooda. Waxay sidoo kale cabirtaa kobaca muddo kadib, oo kuu ogolaaneyso inay dabagasho hormarka canugaaga oo illaa sannad dugsiyeedka iyo sannooyinka badan. Markii canugaaga dhameystiro imtixaanka MAP Growth, waxay heleyaan buundada RIT.



Baaxada RIT si sax ah ayay u cabirtaa waxqabadka ardayga, oo aan laga eegin wax walba oo ay sameynayaan, ka sareeyo, ama ka hooseeyo heerka fasalka.

map GROWTH

Dhibcaha canugaaga ee RIT

Buundooyinka RIT waxay leeyihiin isla micnaha ee heerarka fasalka oo dhan. Ardayda fasalka afaraad iyo ardayda fasalka sideedaad waxay leeyihiin isla buundada RIT ee aqrinta, kadib waxay tijaabinayaan isla heerka ee maadadaas. Cabirkaan saxan wuxuu u ogolaanayaa macalimiinta in ay si saxan u cabiraan koritaanka wax barasho ee ardayga dhamaan sanad dugsiyeedka iyo waqtiga oo dhan.

Waxaad isticmaali kartaa buundada RIT canugaaga si ay uga caawiso buuxinta hadafyadooda. Tusaale ahaan, ardayda waxay gali karaan buundooyinkooda RIT ee qalabka sahmiyayaasha kulliyadaheena si loo arko kulliyadaha iyo jaamacadaha ay jidka u hayaan inay galaan. Waxaad sidoo kale fiirin kartaa koorsooyinka oonleenka ah ee adeegsada buundooyinka 'RIT' si loo siiyo ardayda talo ku saabsan buugaagta iyo laylisyada ku saleysan webka, sida YourReadingPath.com iyo KhanAcademy.org.

> **"MAP Growth waa muhiim sababtoo ah waxay u ogolaataa macalinkeyga iyo aniga inaan aragno aqoontayda iyo kobaceyga boqolkiiba. Xisaab ahaan, buundadeyda waxay ahaan jirtay 227 (boqolkiiba 70), laakin hadeer waa 240 (boqolkiiba 87). Ma ogeyn inaan awooday kobac sidaas u badan, laakin ugu dambeyntii waan sameeyay."**
>
> **Kayla, fasalka 6aad**
> Santa Ana, CA

SU'AALAHA GUUD

Sidee ayay dugsiyada iyo macalimiinta u isticmaalaan buundooyinka MAP Growth?	Macalimiinta waxay isticmaali karaan buundada si ay u soo ogeysiiyaan hababka waxbarashada, waxbarashada gaarka ah, oo kormeero kobaca ardayda shaqsiga. Masuulada iyo maamulayaasha waxay isticmaalai karaanbuundooyinka si ay u arkaan waxqabadka iyo hormarka heerka fasalka, dugsiga, ama degmada oo dhan.
Miyay MAP Growth ii sheegi kartaa haddii canugeyga ka shaqeynayo heerka fasalka?	Haa, laakin fadlan ogoow in buundooyinka MAP Growth ay yihiin kaliya barta xal xog oo macalimiinta u isticmaalaan si ay u go'aansadaan sida ardayga u soo bandhigayo. Fadlan kala munaaqishood macalimiinta wax su'aal ah taasoo aad qabto ee ku saabsan shaqada canugaaga .
Intee jeer ayuu canugeyga qaadanayaa imtixaanada MAP Growth?	Inta badan dugsiyada waxay siisaa ardayda imtixaanada MAP Growth biloowga, bartamaha teeramka, iyo dhammaadka sannad dugsiyeedka (deyrta, qaboobaha, iyo gu'ga). Dugsiyada qaar waxay doortaan inay maamulaan imtixaanada kaliya labo jeer sannadkii.
Maxay habaka yihiin?	NWEA waxay dugsiyada siisaa habab ayagoo adeegsanaaya xogta qarsoon ee kabadan 10 malyan oo arday oo maraykan ah. Iyada oo ogaaneyso sareynta, dhexaadka, iyo hoosaadka ee dhammaan ardaydaan la isku daray waxay u ogolaaneysaa canugaaga inuu barbardhigo halka canugaaga u socdo oo ku caawiyo kobaca. Intaa waxaa dheer, NWEA waxay bixinaysaa xog isbarbar dhig ah ee qaaska, la aqoonsanyahay, Ingiriis ku salaysan, iskoolada caalamiga ah aydoo isticmaalaysa MAP Growth dibadda Maraykanka.
Imtixaanka MAP Growth ma mid la caadcaadiyeeyay?	MAP Growth waxaa loo maamulaa si mar mar ah inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka. Badelkii la weydiin lahaa ardayda oo dhan isla su'aasha, waxay isku hagtaa bandhiga walba ee canuga—iyada oo siineyso cabir aad u saxan oo waxay ay garanayaan. Macalimiinta sidoo kale waxay helaan natiijooyinka isla markaas, taas oo u suurtogaliso inay durbadiiba si dhaqso ah u go'aansadaan.
Su'aalo noocee ah ayaa ku jiro imtixaamada MAP Growth?	Imtixaanada MAP Growth waxaa ku jiro dooqyo badan, kuwa la buuxinaayo meelaha banaan, iyo noocyo kale oo su'aalo ah. Si aad u hesho tijaabo muunadeed, booqo Warmup.NWEA.org.

Tallooyinka loogu diyaargaroobaayo imtixaanka MAP Growth, ka fiiri bogeena:
nwea.org/blog/category/supporting-families/
Ka raadi khayraadka qoyska oo badan barta nwea.org/familytoolkit

nwea

NWEA® waa hay'ad aan faa'iido doon aheyn oo taageertaa ardayda iyo macalimiinta caalamka oo dhan iyaga oo bixinayo xalalka qiimeynta, wargelinada xeeldheer, bixinada waxbaarshada xirfada, iyo adeegyada cilmi baarista. Booqo NWEA.org si aad u ogaatid sida NWEA kuula jaan qaadi karto si ay u caawiso in carruurta oo dhan ay bartaann.

© 2019 NWEA. NWEA iyo MAP waa astaan ganacsi, halka MAP Growth ayka tahay astaanta ganacsigaeeNWEA ee marayka ka iyo dalalka kaleba.
Illustrations © Adam Simpson iyo Heart 2017. Magacyada shirkadaha kale iyo badeecooyinkooda waa aastaanamaha ganacsiga oo milkiiliyaashooda quseysa.

JUL19 | KAP3940